Socialstyrelsen

# naafaynta

# saxaaxa dumarka

**Qoraalkan waxaad ka dalban kartaa:**
Socialstyrelsens kundtjänst, 120 88 Stockholm.
Ama goobta Interneetka oo adreeskeeda ah:
www.sos.se/plus/skrift.htm
Fax: 08-779 96 67

Lambarka buugga ama lambarka qoraalka warbixinta:
2003-114-8

Socialstyrelsen

tryckeri: Ale Tryckteam, Bohus, mars 2003
grafisk form: Typoform AB
artikelnummer: 2003-114-8
ISBN: 91-7201-753-8

Qoraalkan wuxuu ka sheekeenayaa naafaynta saxaaxa dumarka ama sida loo yaqaanno gudniinka dumarka.

- Dhammaan jaadadka naafaynta saxaaxa dumarka waa mamnuuc sida hadba ku xusan xeerka dalka Iswiidan.
- Naafaynta saxaaxa dumarka ku ma xusna kitaabada diimaha.
- Naafaynta saxaaxa dumarka waa fal waxyeelayo caafimaadka dumarka iyo carruurta ba.

Boggaga soo socdo ayaa hab tafatiran logu macnaynayaa falalkan. Qoraalka ka sheekeenaya naafaynta saxaaxa dumarka waxaa lagu turjumay af -ingriisi, -soomaali, -tigrinya iyo -amharinya. Qoraalkan waxaa la soo diyaariyay kadib kolkii lola tashaday Ururka warfaafinta ammuuraha la xirira isutagga RFSU, wuxuuna ku salaysan yahay qoraallo berri hore u ururka soo saaray.

## Gogoldhig

**Qoddobka 1-aad** waxaa ku xusan in aadenaha dhammaantood dhasheen iyagoo xur ah, oona isku qiimo iyo xuquuq leh. Waxay dhammaantood leeyihiin awooda caqliga iyo maanka ba lagu adeegsado, waa in hab walaaltanimmo ku salysan ay isku la dhaqmaan.

**Qoddobka 2-aad** waxaa ku xusan in qof kastaba u xaq ku leeyahay xuriyada iyo xuquuqda ku xusan bayaankan, iyado qofku marna lagu takoorin sabab ka mid ah; qoloda u ka dhashay, midabka jirkiisa, jaadka jinsigiisa, luqadiisa, diintiisa, siyaasada iwm u aaminsan yahay, dhalashada ama bulshada u ka yimi, hantidiisa, asalkiisa ama hawllohiisa. Sidaaso kale waa mamnuuc in wiilasha iyo gabdhaha ama ragga iyo dumarka ay kala xuquuq yeeshaan. [...].

**Qoddobka 3-aad** waxaa ku xusan in qof kasto u xaq ku leeyahay noolol, xuriyad iyo badbaadada shaqsiyeedka.

**Qoddobka 5-aad** waxaa ku xusan in qofna aanan loo geeysan karin silicdil, ciqaab ama fal naxariisdarran, aan biniaadanimmo ahayn ama dulminimmo ku salaysan.

(*Waxaa laga soo xigsaday Bayaanka Xuquuqda Aadenaha ee Qaramada Midoobay, dib loo habeeyay*)

Ololaha ku salaysan dhabarjebinta falalka dumarka lagu curyaamiyo, wuxuu kamid yahay hawlaha lagu ilaaliyo xuquuqda aadenaha, wuxuuna khuseeyaa dhamaan xubnaha aadenaha, kuwaaso kamid yihiin dumarka iyo carruurta. Sidaaso kale waa olole ku salaysan halganka xuquuqda adenaha, sida awooda u qofku u talin karo ammuuraha la xiriira isutagga iyo xaqa ka badbaadida falalka xoog-muquuniska ku salaysan.

Ururka International Planned Parenthood Federation (IPPF) wuxuu baaray sida xuquuqda aadenaha iyo xuquuqda kale ee ku xusan bayaano kala duwan, kuwaaso kamid ah ammuuraha la xiriira isutagga iyo tarmada. Kadib kolkii fiiro gaar ah la siiyay ammuurahan ayaa la soo diyaariyay bayaanka ku salaysan xuquuqda ammuuraha isutagga iyo tarmada la xiriira. Kuwaaso kamid ah naafaynta saxaaxa dumarka. Arrintan waxay ku xusan tahay labada qoddobo oo dhibicdooda ah (2,9). Hawlaha lagu dhabarjebiyo falalka dumarka lagu naafeeyo waxay kalo ku tiirsan yihiin Bayaanka Xuquuq-bulshodeedka Carruurta ee Qaramada Midoobay (qoddobka 19-aad). Waxaa bayaanka hab culus ku qoran in cunuga ”laga badbaadiyo dhammmaan jaadadka xoog-muquuniska ku salaysan, kuwaso kamid ah kuwa loo geeysto jirka ama maanka iyo faraxummaynta”. Qoddobka 24.3 waxaa ku xusan in ”dalalka baaqa oggolaaday ay talabooyin culus ka qaadaan sidii dalalkooda loga ciribtiri lahaa dhaqanxummada waxyeesha caafimaadka carruurta”.

Dalalka loo yaqaanno ”Waqooyiga Adduunka” waxay arrintan horraantii 1980-dii ka ahaan jirtay arrin aanan laga warqabin. Haseyeeshe tan iyo waagaas waxay dalalkaas bilaaween in olole ku salaysan siyaasad oo lagu dhabarjebiyo dhaqan xummadaas. Shirarka caafimaadka dumarka iyo carruurta ee Qaramada Midoobay waxaa lagu muujiyay in falalka aanan marna la oggolaan karin. Waxaa la yiri waa falal ka soo horjeeda mabaad’iida xuquuqda aadenaha ay ku salaysan yihiin. Xubnaha Qaramada Midoobay waxaa xilsaaran ciribtirida dhaqamadaas. Hawlaha dhabarjebinta waxaa kalo ku dhaqaaqay dad rayid ah iyo ururro tiro badan, siiba ururrada dumarka ka nuuxnuuxsado dalalka falalka ka dhacaan. Aragtida cusub ee Qaramada Midoobay waxaa u sabab ah dadaalka dumarka ururradaas xubnaha ka ah.

Gabdhaha iyo dumarka la curyaamiyo waxaa tirodooda lagu qiyaasay inta u dhaxeeyso 100 ilaa 140 malyuun. Sannad kastana waxaa la curyaamiya gabdho tirodooda gaareeyso labo maljuun, waxaa tirokoobka laga soo xigsaday laanta Qaramada Midoobay ee loo yaqaanno WHO. Sidaas awgeed waa in marna la joojin ololaha dhabarjebinta falxummada, taaso lagu ilaalinaayo xuquuqda dumarka iyo carruurta ku saabsan ammuuraha la xiriira isutagga iyo tarmada.

Qoraalkan waxaa loo soo diyaariyay in ammuurahan la shaacbixiyo. Waa maxay naafaynta saxaaxa dumarka, halkee-na looga dhaqmaa. Qoraalku wuxuu kalo ku nuuxnuuxsanayaa saldhigga falxummada, xeerarka iyo hawlaha dhabarjebinta naafaynta saxaaxa dumarka. Qoraalkan waxaa logu talaggalay dadka xiiseeya ammuurahaan iyo kuwa ka soo horjeeda dhaqanxummada.

## Waa maxay naafaynta saxaaxa dumarka?

Naafaynta saxaaxa dumarka iyo gudniinka dumarka waxaa la oran karaa waa isku mid. Tilmaanta falka waa sidan; waxaa qalab ama mindi lagu gooya – qaar kamid ah ama gebi ahaan – xubnaha saxaaxa dibadeed ee gabdhaha. Laanta Qaramada Midoobay ee WHO waxaa laga soo xigsaday in naafaynta saxaaxa dumarka ay ka kooban tahay afar nooc.

**Nooca I-aad,** waxaa la gooyaa dhalfada kintirka, kolkol waxaa la gooyaa qayb kintirka kamid ah ama gebi ahaantiisa ba.

**Nooca 2-aad,** waxaa la gooya kintirka iyo qayb kamid ah dibnaha yaryar ama gebi ahaantiisa ba.

**Nooca 3-aad,** waxaa la gooya dhammaan xubnaha saxaaxa (kuwaaso ka kooban; kintirka, dibnaha yaryar iyo kuwa waaweyn ba). Dabadeedna waxaa laysku tola dibnaha waaweyn sida loo daboolo duleelka siilka, waxaan la taaban oo keliya marin yar oo kaadida iyo dhiiga caadada soo maraan. Noocaan waxaa loo yaqaana Fircooni ama Suudaani.

**Nooca 4-aad** dhibcin ama jeexida kintirka ama/iyo dibnaha. Kolkol waxaa la guba kintirka iyo nudaha agagaarkiisa ku yaalo. Kolkol kalena waxaa la xoqa nudaha ama waxaa la jeexa duleelka siilka, ama waxaa siilka lagu shuba maaddo kullul ama daawo dhir laga sameeyay, ujeedad-na waxay tahay keenida dhiigbaxa ama xirida duleelka siilka.

Waxaa jiro jaad afarta nooc ka kooban. Haseyeeshe nooca ugu caadisan (boqolkiiba 80%) taaso laga soo xigsaday (WHO Fact Sheet No. 241 June 2000) waxaa weeyaan tan kintirka iyo dibnaha yaryar la gooyo. Nooca saddexaad waxaa adeegsado boqolkiiba 15%. Kolkii laga hadlaayo jaadadka curyaaminta, waxaa la magacaaba jaad loo yaqaanno ”sunna” oo ah nooca ugu fudud ee naafaynta dumarka. Haseyeeshe, ”sunna” wuxuu ka kooban yahay dhamaan noocyada naafaynta saxaaxa dumarka aan ku jirin nooca 3-aad. Sidaas awgeed nooca ”sunna” loo yaqaanno wuxuu isna durabdiiba keena dhibaato muddo dheer ah. Sidaas awgeed, naafeynta dumarka nooca ”sunnada” waa in loo dhabarjebiya isla sida loo dhabarjebiyo jaadadka kale.

## Waxyeelada caafimaadka

Dabasocodka falalka naafaynta saxaaxa dumarka waa hadba nooca iyo heerka falxummada. Falka naafaynta saxaaxa dumarka ka dib, wuxuu qofku durbadiiba dareemaa xannuun culus oo faro badan, dhiig-bax iyo argagax. Dumarka qaarkood-na falka awgiis waay isku dhexyaacan. Dhibaatooyinka kale waxaa ka mid ah kaadi-mareenka oo dhaawacma, sidaas awgeed dumar tiro badan ayaa kolkii ay kaadiyonayaan dhibaato la kulmo.

Inanta la curyaamiyay, waxay falka ka dib la kulmi doontaa dhibaatooyin xag caafimaadeed oo joogta ah. Kuwaasoo kamid ah, xanuun joogta ah oo ay ka dareento xubnaha taranka dibadeed iyo hareerehooda. Xanuunkaasi waxay inantu dareemi doontaa xilliga xiga falka ilaa inta ka hartay noolasheeda. Dhibaatooyinka kale waxaa ka mid ah: cuncun, barar godan, barar dheecan leh, hurgun, awooda wax-dhalida oo hoos u dhacdo, calaamooyinka jirka iyo dhibaato joogta ah marka qofku uu kaadinayo. Falka naafaynta saxaaxa dumarka wuxuu kale inanta u keena fulfaxanuun, taasoo u sabab ah falkii lagu gooyay xididihii siday dareenka. Haweeneyda waxay kale ay la kulmi kartaa dhibaatada dhiigbaxa caadada.

Dadka qaarkood waxay yirahdaan; waxaa fiican in gabdhaha intay yar yihiin saxaaxooda la curyaamiyo . Maxaayeelay, waxay illoowi doonaan falka naafaynta iyo xanuunkiisa. Haseyeeshe, cilmi-baaris dhawaan la sameeyay waxaa shaaca laga qaaday in jirku iyo hab-dhiska xididaha dareenka ay san marna illoowin dhibaatadii beri hore ay la kulmeen. Taasoo saamayn doonto goorta ay inanta weynaato oo ay la kulanto xaalad xannuun badan.

## Ammuuraha isutagga la xiriira

Falka gudniinku ma saameeyo guud ahaan rabitaanka galmada haweeneyda. Haseyeeshe, wuxuu falku adkeeya amase u hoos u dhiga sidii haweeneyda lagu raali gelin lahaa. Annagu aqoon buuxda u ma lihin habka falka gudninka u saameeyo biyo-bixida haweeneyda. Haseyeeshe, waxaa ammuurahaas saameeyo nooca naafaynta saxaaxa dumarka iyo habka inanta loo cuyaamiyay. Waxaase shaki ku jirin in falka naafaynta saxaaxa dumarka u hab xun u saameeyo ammuuraha la xiriira isutagga ee haweeneyda.

Ragga waxay dareemaan xanuun goorta ay galmo la yeelanayaan haweeney saxaaxeeda la curyaamiyay. Dhaqamada qaarkood waxaa waajibaadka ninka guursaday ka mid ah innuu dilaaciyo mareenka galmada. Xitaa falkaas ka dib waxaa ninku dhib ku ah in u galmo la yeesho xaaskiisa. Ragga qaarkood wey ka xun yihiin in ay afadooda u keenan xannuun markii ay galmo la yeelanayaan.

## Guurka

Dalalka qaarkood waxaa mudnaan koowaad la siiyaa bikronimada inanta. Taasoo ka mid ah shuruuda ugu weyn oo guurka. Reerka inanka waxay – intii ay san bixin meherka – xaq ku leeyihiin in ay baaraan oogada inanta, siiba goobta laga guday. Aqoonyahannada bulshada waxay shaaca ka qaadeen, in dumarka ay u kala darajo sareeyaan hadba ciriiriga duleel siilka. Taasoo saamayn weyn ku yeelato kolkii aroosada la xulanaayo.

Dumarka aan loo geeysan naafaynta saxaaxa ee ku nool bulshooyinkaas, waxay la kulmaan aflagaado iyo takoorka bulshada. Sidaas awgeed waxaa lagamamaarmaan ah in ragga la wargeliyo ololaha dhabarjebinta naafaynta saxaaxa dumarka. Wuxuunna isbedel imaan karaa markii ragga ay oggolaadaan in ay guursadaan dumar aan saxaaxoda curyaansanayn.

## Dalalkee saxaaxa dumarka lagu curyaamiyaa?

Dalalka gabdhaha saxaaxooda la curyaamiyo  waxaa ka mid ah, dalal tiro badan u ku yaalo qaarada Afrika iyo jasirada Carabta sida, Yemen, Cumaan, Imaaraadka Carabta iyo Baxreen. Dhaqanxumada waxaa lagu dhaqma oo kale dalalka Indoneesiya, Maleesiya iyo beelo ku nool dalaka Pakistaan, Hindiya, Filibiin. Waxaase suurtagal noqon karin in la helo warbixin ku saabsan dhammaan goobaha adduunka oo dhaqanxumada lagu dhaqmo. Waxaa ka la duwanaan karta gobollada isla dalka ku dhaqmo naafaynta saxaaxa dumarka iyo beelaha ku nool dalka.

Shisheeyeyaasha dalalkooda saxaaxa lagu curyaamiyo , waxay dhaqankooda la yimaadaan qaarada Yurub iyo waqooyiga Ameerika. Sidaa awgeed ayaa dhaqanka naafaynta saxaaxa dumarka loga hela qaarada Yurub iyo waqooyiga Ameerika. Dalka Iswiidan waxaa ku nool dumar tiradooda ah 16 000 oo ka yimid dalalka dhaqanka naafaynta saxaaxa dumarka leh. Imminka ma hayno war sugan oo ku saabsan dadka ku nool dalka Iswiidan oo ku dhaqmo dhaqanxumada gudniinka. Laakinse waxaa suurtagal ah in hablaha ku nool dalka Iswiidan sharcidarro saxaaxooda lagu soo naafeeyo dalalkooda amase dalal kale.

## Xagee buu ka yimid dhaqan-xummada naafaynta saxaaxa dumarka

Dhaqanxumada naafaynta saxaaxa dumarka waa dhaqan qiyaastii lagu dhaqmi jiray kumayaallo sano. Waxaa abuuray bulsho dumarka lagu gumeeysan jiray. Afada waxay ahaan jirtay hantida ugu weyn u ninka heli karo, waxayna la mid ahayd maalgelin u hab gaar ah u ilaalsado. Darajada u bulshada ka haystay waxay ku xirnayd habka u gumeeysto afadiisa. Falkaas oo u suragelin jiray innuu xaq ku lahaa waxay haweeneyda dhasho iyo jirkeedaba.

Dumarka qaarkood waxay aamin san yihiin in ay san daahir ahayn hadii ay san gudnayn. Qaar kalena waxay ba aamin san yihiin in dumarka aan gudnayn ay yihiin dhillooyin. Dumarka badidooda waxay aamin san yihiin in kintirka u yahay xubin raggeed oo sidaas awgeed layska gooyo. Inanta waxay xubin ka noqon kartaa wadajirka dumarka da'da weyn ka dib markii saxaaxeeda la curyaamiyay.

Beelaha ku nool dalalka saxaaxa dumarka lagu naafeeyo waxay aaminsan yihiin in biyo-bixida dumarka u ciribtiro awooda shahwada ragga, taaso iyada-na ka hortageyso awooda bacriminta. Haddiise saxaaxa haweeneyda la curyaamiyo waxay heleysa awood ay carruur ku dhasho. Haseyeeshe, waxaa dhabta ah in falka lagu curyaamiyo saxaaxa dumarka u hoos u dhigo awooda taramada.

Qorallo beri hore la qoray, waxaa ku qornaa warbixin ku saabsan galmada. Waxaa la yiri: dumarka aan kintirka laga go'yn waxay noqon jireen dumar aan galmada ka dhergin, ka hela dumar kale amase aan ka fekerin wax aan galmo ahayn. Xaaladaas waxay ku dirqin jirtay in ay iskooda u segeeystaan, taasoo fal "halis" ah. Ilaa 1900-dii dumarka ku nool qaarada Yurub waxaa lagu naafeyn jiray saxaaxooda sidaas awgeed.

## Dhaqanka

Ummulisooyin iyo dumar da' weyn oo tiro badan, ayaa ilaa imminka u sabab ah hirgelinta falka gudniinka. Waa koox hab xoog leh u tixgeliyo dhaqanxummada oo aamin san in ay waajib ku tahay dhaqangelinta dhaqanxumada gaboobay. Kuwa saxaaxooda la curyaamiyay waa hablo iyo dumar da' yar. Inanta hooyadeeda waxaa hab xoog leh u saameeya bulshada, sidas awgeed iyadoo aan raali ka ahayn ayey haddana curyaamisaa saxaaxa inanteeda. Teeda kale, hooyada waxay aaminsan tahay in inanteeda hab fudud lagu guursan doono kadib markii la curyaamiyay.

Waa muhiim garashada aqoondarrada ku saabsan naafaynta saxaaxa dumarka. Sida kor ku xusan, waxay bulshooyinka qaarkood aamin san yihiin in kintirku uu yahay xubin raggeed. Haddaba sidii inanta ay dheddig ku noqon lahayd awgeed waxaa ku khasban in laga gooyo kintirka. Waxay aamin san yihiin oo kale in haddii aan kintirka laga gooyn ay xubinta isku rogi karto xubin raggeed "gus". Khuraafaadka kale ay aamin sanaayeen waxaa ka mid ah in xubinta kintirka u dhaawac amase geeri u keeni karo ubadka durbadiiba markii u dhasho.

Gabdhaha da'da yar waxay isku ekeeysiiyaan hooyooyinkooda, taaso xilli dheer qaadato. Haddaba sidii inanta ay ku heli lahayd aqoonsi dumarnimmo waa in ay isku ekeeysiisaa hooyadeeda. Cilmibaaris la sameeyay waxay shaaca ka qaaday in dareenka jinsiga dumarka u ku xiran yahay sida hadba wax iskaga beddeleen xubnaha taranka dibadeed ka dib markii inanta saxaaxeeda la curyaamiyay . Falxumodaas ka dib waxaa inanta ku adag qiimeeynta falka. Waxay is-weydiisa haddii falku u mid lagamamaarmaan u ahaa dumarnimadeeda iyo haddii kale.

# Diinta

Wax badan ayaa laga dooday xiriirka diintu iyo dhaqanxummada guditaanka. Maxaayeelay, waa dhaqan-xumo jiri jiray diinta kirishtanka iyo tan muslimka ba horraantooda, oo wax xiriir ah la lahayn diinta. Dhaqanxumada naafaynta saxaaxa dumarka ku ma xusna kutubada Injiil iyo Furqaan ba midna.Haddana waxaa dhaqanxumada ku dhaqma dad kirishtiyaan,muslin iyo kuwa aanba diin lahayn.Muslimiinta badidooda waxay aamin san yihiin in dhaqanxumada naafaynta saxaaxa dumarka ay ku xusan tahay diinta.

Nebi Muxammed CSW, markii u la kulmay dhaqankan, guud ahaan ma u san mamnuucin. Waxaa la yiri, Rasuulka wuu oggola falku haddii u san ahayn fal culus. Sidaas awgeed waxaa dhashay dood ku saabsan ammuuraha. Waxaa laga doodi jirey haddii naafaynta saxaaxa dumarka u yahay dhaqan islaan iyo haddii kale. Waxaa la yiri: waxaa lo maleenayaa in Nebi Muxammed CSW u san hablihiisa gudin, weligiisna falka gudniinka cidna ku ma dhirigelin.

Waxaa la hubaa in diinta kirishtanka ay san ku xusnayn amase aan la oggolayn falka gudniinka. Sidaas awgeed ayaa qof kriishtaan diinta awgeed logu gudin. Kinisaddo faro badan ayaa la dagaalamma dhaqanxumada, haseyeeshee weli waxaa dhacda in la gudo gabdhaha kirishtanka ee ku nool agagaarka beelaha dhaqanxumada ku dhaqmo. Sidaaso kale, diinta iyo kitaabka yahuuda Tora iyo kitaabbo la mid ah waxaa ku xusan in aan la oggoleen in gabdhaha saxaaxooda la curyaamiyo .



# Sharciiyada

Falka naafaynta saxaaxa dumarka/gabdhaha wuxuu dalka Iswiidan ka yahay fal sharci-jebin ah (1982:316). Xeerka waxaa ku qoran:

**1 §** Waa mamnuuc in falaadxumo/qalitaan lagu sameeyo xubnaha taranka dibadeed oo dumarka, iyadoo ujeedadu tahay in saxaaxooda la curyaamiyo ama qaabkooda wax laga bedelo. Waa mamnuuc xitaa haddii qofku u raali ka yahay in la gudo. (Sharciga 1998:407).

**2 §** Qofkii jebiya qodobka koowaad waxaa lagu ciqaabi doona xabsi ilaa afar sano ah. Haddiise sharci-jebinta ay halis geliso noolasha qofka falka lagu sameeyay amase cudur halis ah ku dhaco waxaa sharci-jebinta lagu qiyaasi doona mid aad u culus. Qofkii denbi culus lagu oogo waxaa caadi ahaan lagu ciqaabaa labo ilaa tobban sano oo xabsi ah. Qofkii jebiya mid ka mid ah qoddobada hoos ku qoran waxaa lagu ciqaabi doona sida hadba ku xusan cutubka 23-aad xeerka ciqaabta. Waxaa qoddobada ka mid ah: qofkii denbigelida ka warqabay oo aan booliska wargelin, iskudayo, diyaargareeyo amase denbi-gelid isku diyaariyo. (Sharciga 1998:407).

**3 §** Qofkii dambiga galay sida hadba ku xusan xeerkan, waxaa lagu eedeyn karaa maxkamadaha dalka Iswiidan hortooda, xitaa haddii aan la adeegsan karin cutubka 2-aad qoddobka 2-aad ama 3-aad ku xusan diiwanka dambiileyaasha.

Sida hadba ku xusan xeerka dalka Iswiidan waa mamnuuc dhammaan jaadadka saxaaxa dumarka lagu naafeeyo. Kuwaaso ka mid ah nooca ugu culus (infibulation) – waxaa dumarka laga gooya xubnaha taranka dibadeed, ka dibna laysku tola dibnaha weyn sidii

loo daboolo daloolka siilka – ilaa kan kool-koolida kintirka. Falku waa mamnuuc xitaa haddii inanta/haweeneyda ay oggoshahay. Qofkii ku nool dalka Iswiidan, oo ka qaybgalo diyaarinta fal gudniin, taasoo lagu hirgeliyay dal naafaynta saxaaxa dumarka laga oggol yahay, waxaa qofkaas denbi lagu soo oogi karaa dalka Iswiidan, oona lagu ciqaabi karaa. Wuxuu ku xusan yahay qoddobka 3-aad oo hirgalay 1 luuljo 1999. Waxaa dalka Iswiidan mamnuuc ka ah, in qofka dib loo tolo ka dib markii ay uummusho. Laakinse waxaa la oggol yahay dib u hagaajinta qaabka xubinta taranka dibadeed. Xeerka Adeegga Bulshada – cutubka 14-aad, qodobka 1-aad § – waxaa ku xusan in dhammaan shaqaalaha daryeelka caafimaadka carruurta iyo dhallinyarada u xilsaaran yahay wargelinta Guddiga Ammuuraha Bulshada. Haddii cunugu ama da'yarku u dhibaataysan yahay taaso u baahan badbaadada guddiga, waa iney durbadiiba guddiga wargeliyaan. Dhibaatadaas waxaa kamid ah haddii cunugu la curyaamiyay ama ay jirto halis lagu curyaamiyo. Haddii ay jirto xaalad degdeg ah wuxuu guddiga xaaladaas awoodaa innuu la wareego xannaanada cunuga.

Dalka Iswiidan siyaabo badan oo ka la duwan – gudaha iyo dibedaba – ayu ugu halgamaa caafimaadka, horumarka iyo xuquuqda carruurta. Halgankaas waxaa ka mid ah, ololaha logu soo horjeedo dhaqanxumada naafaynta saxaaxa dumarka gabdhaha iyo dumarka ba. Sida dalal faro badan dalka Iswiidan wuxuu oggolaaday shuruudaha ku qoran baaqa caalamiga ah, Baaqa Xuquuq-Bulshodeedka Carruurta ee Qaramada Midoobay, qoddobadiisa 24-aad § 3-aad waxaa ku xusan in dalalka baaqa saxiixay ay hab waxtar leh u la dagaalamaan, oona u baabbi'yaan dhammaan wixii dhaqanxumo ah, oo dhibaato u geysan karo caafimaadka carruurta. Dhaqanxumada waxaa ka mid ah dhaqanka naafaynta saxaaxa gabdhaha/dumarka.

## Dumarka naafeeysan ee dalka Iswiidan ku nool

Dalka Iswiidan waxaa ku nool dumar tirodooda lagu qiyaasay 16000 (Waa tirokoobkii 2000) oo ka yimi dalalka dhaqan ahaan saxaaxa dumarka lagu naafeeyo. Tiro lagu qiyaasay 14 500 waxay ka yimaadeen dalalka Soomaaliya, Eritreeya iyo Itoobiya. Waxaa dalka Iswiidan ku nool carruur da'dooda ka hoseeyso toddobo sano kuwaaso ka yimi dalalka saxaaxa dumarka lagu naafeeyo.

Qaxootida ka yimi qaarada Afrika oo sannooyinkii ugu danbeeyay yimi dalka Iswiidan, waxay abuureen in ammuurahan fiiro gaar ah lagu siiyo goobaha dumarka lagu daryeelo ama ay ku ummulaan.

## Dumarka la naafeeyay caawinaadee heli karaan?

Waayahan danbe dumarka la naafeeyay waxay heli karaan fursada daryeelka. Waxay caawinad awgeed la xiriiri karaan xarunta dhallinyarada, rugta caafimaadka dumarka iyo waxda dumarka ee isbitaalada.

Haweeneyda waxay caadi ahaan takhtar la xiriirta kolkii ay jirto dhibaatada dhiiga caadadu keento, jirbarrar, fasas, dhibaatada la xiriirta galmada, kolkii galmada ugu horreeyso ay yeelanayaan ama kolkii ay uur qaadan. Waxay takhtarka kala xaajoon karaan dhibaatada iyo waxkaqabadkeeda. Wax-ka-qabadaka dhibaatada waa hadba nooc naafaynta iyo sida falka loo saameeyay. Natiijada

waxkaqabadka wey wanaagsan tahay, dhibaatooyinkii berri hore lala kulmi imminka waa la ciribtiray.

Dumarka la curyaamiyay sida hadba ku tilmaaman nooca 3-aad, waxaa badi ahaan lagu fura isbitallada kadib markii la suuxiyo, laakinse waxaa xitaa la fura iyago aanan la seexin oo goobta la kabaabsiiyo. Takhatarrada qaarkood waxay adeegsadaan qalabka loo yaqaanno "laser", taaso natiijadeeda wanaagsan tahay. Haddii kintirku qayb berri hore laga gooyay, xub axaleedka goobta waxba lagama qabto, maxaayeelay,  goobtaas waxay noqonaysa goob aad u dareen badan, taaso haweeneyda dhibaato u keeni karto kolkii ay fadhiso ama ay surwaal gashato. Kolkii la furayo, waxaa wax laga qabta oo kale – waa haddi ay suurtagal tahay –  dhibaatooyinka daba socdo naafeynta. Dumarka qaarkooda waxay dareemaan xannuun kadib markii la furo, waxaa u sabab noqon karta barkiwaraabe soo noqnoqday, ama goob dhaawacsan taasoo u sabab ah la'aanta dibnahii badbaadi jiray. Waxaa muhim ah in haweeyneyda kormeerid awgiisa ay takhtarka dhowr jeer soo booqato.

## Dhabarjebinta dhaqanxumada naafaynta saxaaxa dumarka

Hawlaha dhabarjebinta dhaqanxumada gudniinka, waxay ka bilaawdeen dalal fara badan iyago ah heerar kala duwan. Siiba dalalka lagu dhaqmo dhaqanxumada. Waxaa waayahaan danbe sare u kacay tirada dadweynaha ku nool dalalkaas oo ka soo horjeedo dhaqanxumada. Urur la magac baxay IAC, Inter African Committee on Traditional Practicicies Affecting the Health of Women and Children, ayaa 1984-kii aasaaseen dumar Afrikan ah. Ururku wuxuu ammuuraha naafaynta saxaaxa dumarka ku saabsan la taliyaa Qaramada Midoobay (UN). Guddiyo heer qarmeed ah ayaa laga asaasay dalal ku yaala qaarada Afrika. Kuwaasoo heer siyaasadeed ku dhaqaaqay dhabarjebinta dhaqanka naafaynta saxaaxa dumarka. Guddiyada waxay abaabuliyaan mashruucyo lagu hawlgeliyo dhabarjebinta dhaqanxumada naafaynta saxaaxa dumarka, siiba beelaha ku nool baaddiyaha. Ururku wuxuu ku guleystay innuu ammuurahaan hor keeno shirarka waaweyn ee caalamiga. Maxaayeelay, ammuuraha berri hore laga ma hadli jirin.

Tababbarka aqoonta isutagga la xiriirta ee logu talaggalay dumarka ku nool dalalka curyaaminta saxaaxa ka mid yahay fal dhaqmeed, maha arrin fudud, taaso u sabab ah aragtida bulshada. Haddaba sida dhibaatadaas xal logu helo awgeed ayaa waxaa laga hadla caafimaadka iyo hab-dhiska jirka. Mashruuc dalka Mali ka hirgalay waxay dumarka aanan saxaaxoda curyaansanayn socdaal ku tagaan baadiyaha dalkooda, waxay wada-hadal la yeeshaan dumarka saxaaxooda la curyaamiyay. Dumarkaas waxaa lagu guubaabiyaa in saxaaxooda ay soo bandhigan, dabadeedna ka shekeeyaan dhibaatooyinkooda. Hogaamiyaasha mashruuca waxay iyaga-na soo bandhigan saxaaxyadooda – aan qabyada ahayn – dabadeedna waxay bixiyaan tilmaan ku saabsan shaqada kala duwan ee xubninta qabato, kuwaaso kamid ah dhiiga caadada iyo ummulida. Habkaas ayaa dumarka ku nool goobahaan aqoon lagu siiyaa, taaso ku saabsan naafaynta saxaaxa dumarka iyo dhibaatooyinka dabasocodo, waxaana la rajeynayaa in aqoonta cusub ka hortagto faafinta dhaqanxummada.

Hababka kale oo dalalka Gambia iyo Sierra Leone laga adeegsaday oona lagu guleeysatay, ayaa sidan ah, waxaa laysugu yeeraay shaqsiyaadka xirfad ahaan saxaaxa dumarka naafeeyo, kadib waxaa la baaray sababta ay "xirfada" ugu shaqeeysataan. Waxaa la

shaacbixiyay in badidooda ay yihiin dumar xirfad iyo daqli kalena aysan lahayn oona dugsi weligood dhigan. Teeda kale waa shaqsiyaad sumcad wanaagsan bulshada ka leh. Shaqsiyaadka waxaa loo bandhigay waxbarasho aan saamayn ku yeelan doonin sumcada bulshada ay ku leeyihiin. Waxyaalaha la baray waxaa kamid ah aqoonta hab-dhiska jirka, taaso u suurtagelineeyso in ay ku shaqaystaan xirfada ummulisada. Waxaa la siiyay awood ay amaah shuruud fudud leh ku qaataan, taaso u suurtagelineeyso in ay ku dhaqaaqan ganacsi. Mashruuca cusub waa lagu guleeystay, waxayna dhalisay in ururka u la soo xiriiro shaqsiyaad ku talo jiray in ay ku shaqaystaan gudniinka, haseyeeshe is-beddelay. Waxay codsadeen in la siiyo isla-tababbarradaaso kale. Natiijada waxkaqabadka waxay noqotay in dalkii Sierra Leone oo berri boqolkiiba 90 lagu naafayn jiray, u tirokoobkaas hoos u dhaco, imminka waa boqolkiiba 60.

Waxkaqabadka falxummada waxaa kalo kamid ah hirgelinta xafladaha cusub oo lagu beddelay kuwi gudniinka. Kolkii saxaaxa inanta la curyaaminaayo waxaa dalalka qaarkood loo xafladeeya sida munaasabada qaangaarka inanta. Haddaba, falka naxaarisdarrada ku salaysan waxaa lagu beddelay xaflad aqoon-korsasho ah, sida xufnaanta, caafimaadka, bikronimada, xurmada qoysaska, kormeerka ammuuraha isutagga ee dumarka iwm. Mashruucan cusub wuxuu ka hirgalay tuulooyin ku yaala dalalka Kenya iyo Tanzania.

Dalka Senegal waxaa jiro urur Mareekan ee madaxbanaan oo la yirahdo Tostan. Ururku wuxuu la wada shaqeeya laanta Qaramada Midoobay ee Unicef, wuxuuna u halgamaa xuquuqda aadenaha iyo dhabarjebinta curyaamida saxaaxa dumarka. Hawlwadeneyaasha ururka waxay socdaal ku tagaan tuulooyinka, waxayna dadka ku nool tuulooyinka u bandhigaan barnaamijo iyo tababbarro ku saabsan xuquuqda aadenaha oona logu talaggalay beelaha ku nool (Village Empowerment Program). Ujeedada waxay tahay in la horumario awooda bulshada tuulooyinka ku nool. Taasoo u suurta gelineeyso in ay fiiro gaar siiyaan dhibaatada jirta. Waxyaalaha dadweynaha la baro waxaa kamid ah daryeelka caafimaadka iyo sida shirkadaha loo maamulo. Ururku wuu ku guuleystay hawlohiisa, maxaayeelay beelaha badidooda waxay ciribtireen dhaqan-xummada curyaaminta saxaaxa dumarka.

Shirweynihii adduunka oo Qaramada Midoobay oo logula talagalay caafimaadka dumarka iyo carruurta oo magaalada Qahira lagu qabtay sanadkii 1994, magaalada Peking 1995, waxaa laga hadlay falxumada gudniinka. Ergeyada shirka waxay isla garteen, in dawlad kasta ay is xilsaarto sidii dhaqanxumada wax loga qaban lahaa oona loo dhabarjebin lahaa. Waxaa kale la go'aamiyay in dhaqanxumada naafaynta saxaaxa dumarka ay ka mid tahay qoddobada wax yeesho xuquuqda aadenaha. Xitaa Midowga Yurub wuxuu xubnahiisa ka codsaday in ay dhabarjebiyaan dhaqanxumada gudniinka. Ururrada kale oo la dagaalammo dhaqanxumada naafaynta saxaaxa dumarka waxaa ka mid ah ururka FORWARD, foundation for Women`s Health, Research and Development, ee saldhigiisu yahay magaalada London iyo ururka GAMS oo Fransiiska iyo Rainbo oo ah urur caalami ah, mashruuc iyo xafiisyo ku leh dalal badan.

## Hawlaha dhabarjebinta dhaqanxumada naafaynta saxaaxa dumarka ee Iswiidhan

Dhowr ururro oo shisheeye ah, sida Ururka Soomaaliyeed ee magaalada Stockholm, waxay ku dhaqaaqeen hawlaha dhabarjebinta

curyaaminta saxaaxa dumaraka, taaso kamid ah hawlaha caadi ahaan ay u qabtaan ama kuwa kamid ah hawlaha caafimaadka.

Ujeedada mashruucii magaalada Göteborg ee ugu weyneyd waxay ahayd in heer sare loo qaado xaalada caafimaadka – jirka iyo maanka ba – ee qoysaska iyo gaar ahaan dumarka khuseeyaa ammuurahan. Saldhigga hawl fulinta mashruuca, wuxuu ahaa wada-shaqeynta kooxaha ammuuraha khuseeya iyo hawlwadeneyaasha mashruuca. Is-bedelka aragtida shisheeyaha ku nool dalka Iswiidan ku saabsan dhaqanxumada naafaynta saxaaxa dumarka, wuxuu suurtagal noqon karaa ka dib markii la tixgeliyo dhaqanka, aragtida, diinta iyo hab-dhaqanka shisheeyaha.

Hawlwadeneyaasha mashruuca waxay la xiriiran o ay la wada shaqeeyaan dadka xirfad ahaan la kulma dumar la naafeeyay iyo qoysaska caruurtooda ku sugan halista naafaynta saxaaxa. Qoraalka dhaqanka xannuunka badan ”Den smärtsamma traditionen” waxaa laga dalban karaa Golaha Maamulka Gobolka Socialstyrelsen.

RISK, urur-qarmeedka la magacbaxay RISK waxaa la aasaasay 1994, waana urur u halgama sidii dhaqanxummada curyaaminta saxaaxa dumarka loga dhabargoyn lahaa dalka Iswiidan. Ururuku waa ergeyga dalka Iswiidan u fadhiyo ururuka IAC, wuxuuna ka qaybgalaa shirarka Midowga Yurub looga soo horjeedo dhaqanxummada. Ururka wuxuu abaabula tababbarro logu talaggalay shisheeyeyaasha ka yimi qaarada Afrika, kuwaaso doonaayo iney dhabarjebiyaan dhaqanxummadaas iyago tiirsan kooxo qarmeed. Mashruucyada waxaa ka shaqeeyo dumar wararka faafiya. Dadka ku nool xaafadaha shisheeyaha ay u badan yihiin sida kuwa ku yaala magaalooyinka Stockholm, Uppsala iyo Malmö waxay ka fa'iideysan karaan khibradooda. Hawlaha guud ee ururuka waxay ku toosan yihiin taageero-siinta afrikaanta iyo kuwa kale dhaqamadaas ay saameyaan. Taaso u suurtagelineyso in iskooda uga shaqeeyaan sidii aragtida iwm ay wax ugu beddeli lahaayeen, iyo sidii dalalkooda iyo adduunka dhaqanxummadaas loga ciribtiri lahaa.

Aragtida ururka warfaafinta ammuuraha la xirira isutagga RFSU ayaa waxay tahay in dhaqanxumada naafaynta saxaaxa dumarka ay la mid tahay cadaadiska iyo ilaalinta ammuuraha la xiriira isutagga ee dumarka. Wuxuu kale u ururka warfaafinta ammuuraha la xirira isutagga aamin san yahay in dhaqanxumada naafaynta saxaaxa dumarka ay la mid tahay jirdil culus oo loo geystay dumarka. Taaso wax yeeleysa saldhigga xuquuqda aadenaha. Hawlaha ururka warfaafinta ammuuraha la xirira isutagga oo ay ka mid yihiin la dagaalanka dhaqanxumada naafaynta saxaaxa dumarka waxaa guud ahaan lagu fuliyaa heer caalami ah. Ururka warfaafinta ammuuraha la xirira isutagga iyo qofka dhibaatada loo geystay waxay wadajir u halgamaan sidii dhaqanxumada loga joojin lahaa dalalka ku dhaqmo. Ururka warfaafinta ammuuraha la xirira isutagga wuxuu ku dadaala in ahmiyaad koowaad iyo taageero dhaqaaleed la siiyo ururrada la dagaalammo dhaqanxumada gudniinka. Ururku wuxuu soo diyaariyay qorallo warfaafin ah, wuxuuna la wada shaqeeyaa ururrada shisheeyaha, taaso suurtagelineyso bandhigida dhaqanxummada. Natiijada wada-shaqaynta aad bey u wanaagsan tahay.

Ururka Badbaadada Caruurta wuxuu gaar ahaan ugu shaqeeyaa sidii loo badbaadin lahaa carruurta dhibaataysan. Taaso ku salaysan Baaqa Xuquuq-Bulshodeedka Carruurta ee Qaramada Midoobay ku nool adduunka. Ururka Badbaadada Carruurta wuxuu aamin san yahay in dhaqanxumada naafaynta saxaaxa dumarka u saamayn xun ku yeelan karo caafimaaka jirka iyo maanka ee carruurta, oona yahay fal jebiyo shuruudaha ku xusan baaqa xuuquqda aadenaha iyo Baaqa Xuquuq-Bulshodeedka Carruurta ee Qaramada Midoobay. Ururuka wuxuu ka shaqeeyaa heerar dhaqameed kala duwan, wuxuuna

aadenaha u la kulma hab xushmo iyo garasho ku salaysan. Waxuu ku dadaala in dhaqanxummada lagu dhabarjebiyo kadib kolkii la shaacbixiyo sababta keentay.

Ururka Badbaadada Carruurta wuxuu hab buuxda oo daacad ku salaysan ugu halgamaa sidii dhaqanxummada looga ciribtiri lahaa dalalka Itoobiya, Eritreeya, Guinea Bissau iyo gobollo ku yaallo galbeedka qaaradda Afrika. Hawlaha waxaa lagu dhaqan geliyaa warfaafin iyo kicinta garashada dadweynaha ku nool degmooyinka iyo gobollada. Kooxaha habka gaar lo adeegsado waxaa ka mid ah waayeelada, xeer soo sareyaasha, go'aan gaareyaasha iyo qareennada. Kooxaha kale ee muhimka ah waxaa ka mid ah: kuwa wararka faafiyo, ururada hab toos ah u la shaqeeyo carruurta/dhallinyarada iyo kuwa xirfad ahaan ku dhaqaaqa falxummada. Hawlwadeneyaasha Ururka Badbaadada Carruurta waxay isla markii tixgeliyaan hab-dhaqanka bulshada. Waa haddii ay suragal noqon karto.

Ururka samafalka SIDA wuxuu tobbaneeyo sano hab firfircoon u taageerayay hawlaha dhabarjebinta falalka naafaynta saxaaxa dumarka, siiba dalalka ku yaala qaarada Afrika. Hawlaha ururka waxaa laga hirgeliyay iyado taageero la siiyo ururrada dowladha ka madaxbannan NGO:s (Non-Governmental Organisations) sida ururka IAC. Ururradaas waxay abaabulaan hawllo logu hortago iyo kuwo lagu kiciyo aragtida dadweynaha. Taageerada ururka u bixiyo, taaso ka kooban mid laba doceed ah iyo mid dhowr doceed ah, wuxuuna toos u siiyaa dalalka ururka la wada shaqeeyo ama wuxuu taageero-siiyaa laamaha Qaramada Midoobay WHO, UNFPA iyo Unicef.

Waaxda caafimaadka ee ururka samafalka waxay taageero siisaa ururka Rainbosom. Hawlaha ururka Rainbo waxay ka kooban yihiin ”mashruucyo aan sidaas u weynayn”. Ururku wuxuu taageero-dhaqaaleed siiyaa mashruucyo yaryar oo logu dhaqaaqay dalal kala duwan ku yaala qaarada Afrika. Ururka Rainbo wuxuu qorsheeyaa shabaqada afrikaanka Amanitare, waa urur ka halgama dalal ku yaala qaarada Afrika, halgankiisana wuxuu ku salaysan yahay dhabarjebinta dhaqanxummada naafeynta saxaaxa dumarka.

Dowlada waxay 1998-kii hawlgelisay Golaha Ammuuraha Bulshada – Socialstyrelsen, kuwaaso ku saabsan ammuuraha naafeynta saxaaxa dumarka –”Hawlaha waxay ka kooban yihiin faafinta iyo horumarinta hab waxkaqabadka iyo abaabulinta mashruuc lagu dhabarjebiyo dhaqanxummada naafeynta saxaaxa dumarka iwm” (S98/5141/ST). Golaha waa innuu fiiro gaar ah siiyaa xirfadaha iyo shisheeyeyaasha ammuurhan khuseeyo. Golaha wuxuu ku dhaqaaqay hawlo waafaqsan guubaabinta dowlada, kuwaaso kamid ah dhaqdhaqaaqyo iyo hab waxkaqabad kala duwan logu talaggalay kooxaha ammuuraha khuseeyso. Waa hawllo ku salaysan ka hortegid iyo waxkaqabasho, ujeedaduna ay tahay horumarinta karti-xirfadeedka, kicinta aragtida bulshada iyo tixraacid. Waxaa berri hore taageero la siiyay mashruuci saddexda sano ahaa ee magaalada Göteborg, kaaso dhamaaday 1996-kii. Xilhaayeyaasha mashruuca waxay imminka yihiin la-taliyeyaal, dhammaan dalka Iswiidan lagala soo xiriiro. Waxaa kalo taageero-dhaqaaleed la siiyay mashruuca magaalada Malmö iyo Stockholm, waxaa sannooyinki u dhaxeeyay 1998–2001 la soo diyaariyay dhowr qorallo oo ku salaysan warbixinta cilmibaareyaasha. Warbixin dheeraad ah waxaa laga heli karaa goobta Internetka www.sos.se.

# Warbixinta qoraalkan ku qoran waxaa laga soo xigsday

*Buugagga*

Agholme Johansson, Birgitta (1994), *Tusen om dagen...* Waa buug ka shekeeynaayo curyaaminta saxaaxyada dumarka dalka Masar ku nool. Uppsala universitet, Teologiska institutionen.

Andersson–Brolin, Lillemor (1997), *Vi har ju alltid omskurit våra flickor!* Waa buug ka shekeeynaayo curyaaminta saxaaxyada dumarka. Rädda Barnen. Ka dalbo: Rädda Barnen.

Carlbom, Aje m.fl. (2000), *Som Gud skapade oss* – Waa buug ka shekeeynaayo asluubta curyaaminta saxaaxyada dumarka soomaaliyeed ku nool magaalada Malmö. Malmö stads program Sexuell hälsa. ISBN 91-631-0051-7. Ka dalbo: Malmö stads program Sexuell hälsa, Box 171 95, 200 10 Malmö. Qoraalka oo ku qoran Af-iswiidish ama af-soomaali ayaa la heli karaa www.sos.se.

Dorkenoo, Efua (1994). *Cutting the Rose. Female Genital Mutilation: The practice and its prevention.* Minority Rights Publications. ISBN 1-873194-95-1. Ka dalbo: Minority Rights Publications, 379 Brixton Road, London SW9 7DE, United Kingdom.

Hosken, Fran P (1995), *Stop Female Genital Mutilation – Women speak. Facts and actions*. Women´s International Network News. ISBN 0-942096-10-x. Ka dalbo: WIN NEWS, 187 Grant Street, Lexington MA 02173, USA.

Ismail, Nima & Sörman Nath Ylva (2000), *Ingen frågade mig.* Wuxuu ka shekeeynaayo curyaaminta saxaaxyada dumarka ku nool dalka Iswiidan. Stiftelsen Kvinnoforum. Ka dalbo: www.kvinnoforum.se ama Kvinnoforum, tel. 08-562 288 00.

Kulick, Don red. (1987), Från kön till genus. Waxaa ku qoran maqaal ”Hal hab ayaa dumarka iyo ragga ba loo abuuray, qore Aud Talle. Carlsson Förlag. ISBN 91-7798-124-3.

Omsäter, Margareta (1996), *Den smärtsamma traditionen* – Mashruuca magaalada Göteborg wuxuu ka shekeeynaayo curyaaminta saxaaxyada dumarka. Göteborgs invandrarförvaltning. ISBN 91-630-4821-3. Ka dalbo : Socialstyrelsen.

Rahman, Anika & Toubia, Nahid (2000), *Female Genital Mutilation: A guide to laws and policies worldwide*. Zed, London. ISBN 1-85649-773-9.

*Socialstyrelsens meddelandeblad nr 5/00*, Ändringar i lagen (1982:316) med förbud mot könsstympning av kvinnor. Ka dalbo: www.sos.se/plus/skrift.htm

*Kvinnlig könsstympning* – waxaa loogu talaggalay dugsiyada, maamulka adeegga bulshada iyo daryeelka bukaanka iyo caafimaadka. Socialstyrelsen 2002. ISBN 91-7201-660-4.

Sennemark, Said Musse & Abdulkadir (2002), *”Kvinnlig könsstympning. Om kvinnlig könsstympning som kulturarv*. Saddex aqoonkorsasho/seeminaar soomaali ah Göteborg.”. Waxaa laga soo qaadan karaa goobta internetka www.tidsspeglar.goteborg.se, raadso ”könsstympning”.

# Waxaa kalo laga soo xigsaday

Laanta Qaramada Midoobaya WHO waxaa laga heli karaa tirokoob iyo wararka ugu danbeeyay ku saabsan curyaaminta saxaaxa dumarka, booqo goobta Internetka. Raadso: www.who.int/frh-whd/FGM/index.htm

*Buugagga sheekada*

Devine, Laurie (1984), *Nilen*. Bokförlaget Forum. ISBN 91-37-10429-2.

Dirie, Waris (2001), *En blomma i Afrikas öken*. Bra Böcker pocket. ISBN 91-7133-812-8.

Kassindja, Fauziya & Miller Bashir, Layli (2000), *Vem hör mina tårar*? Bra Böcker. ISBN 91-7133-499-8.

Walker, Alice (1992), *Omskärelsen*. Trevi förlag AB. ISBN 91-7161-042-1.